

# Muhiimadda Sharciga

W/Q: Keyd Xasan Daahir

Sharcigu waxa uu kaalin muhiim ah kaga jiraa nolosheenna, isaga oo saameyn noogu leh siyaalo waaweyn iyo kuwa yarba. Waa kuwan qaar ka mid ah sababaha muhiimka ah ee uu sharcigu muhiim u yahay:

## Ilaalinta Nidaamka iyo Badbaadada

Sharciyadu waxay dejiyaan hab-dhaqanka, xuduudaha iyo ka hortagga falalka waxyeellada leh. Waxay naga ilaaliyaan rabshadaha, tuugada iyo noocyada kale ee dambiyada iyo kor u qaadidda dareenka amniga iyo xasiloonaada bulshada dhexdeeda.

## Horumarinta caddaaladda iyo Kala dambeynta

Sharciyadu waxay bixiyaan hab lagu xalliyo khilaafaadka oo lagula xisaabtamo shakhsiyaadka falalkooda. Tani waxay xaqiijinaysaa in qof walba si

lamid ah bulshada kale loola dhaqmo, wixii qaldanna loo wajaho si caddaalad ah oo aan eex lahayn.

### **Ilaalinta Xuquuqaha Aasaasiga ah**

Sharciyadu waxay noo ilaaliyaan xuquuqdeenna aasaasiga ah, sida xoriyadda hadalka, diinta iyo wada noolaashihaya, Waxay ka hortagaan takoorka iyo dulmiga, iyadoo hubinaya in shakhsiyaadku ay ku noolaan karaan sharaf iyo madaxbannaani.

### **Fududeynta Dhaqdhaqaaqa Dhaqaalaha**

Sharciyadu waxay abuuraan jawi la saadaalin karo oo hufan oo ganacsiyadu ku shaqeeyaan. Waxay dejiyaan qandaraasyo, xuquuqda lahaanshaha iyo habab kale oo sharci ah oo awood u siinaya ganacsiga iyo hal-abuurka inay horumaraan.

### **Horumarinta Bulshada**

Sharciyada waxaa loo isticmaali karaa in wax looga qabto caddaalad darrada bulshada iyo sinnaan la'aanta. Waxaa loo meelmarin karaa si loo ilaaliyo dadka nugul,

korna loogu qaado joogtaynta nabadda degaanka iyo horumarinta yoolalka kale ee muhiimka u ah bulshada.

## **La jaanqaadidda Bulshada**

Marka ay bulshooyinku isbeddelaan oo ay horumaraan, sharciyadu waa in ay la qabsadaan si ay u muujiyaan baahidooda iyo qiyaamkooda. Nidaamkan la jaanqaadidda ummadda wuxuu xaqiijinayaa in sharcigu uu sii ahaado mid khuseeya oo waxtar u leh ilaalinta mabaadi'da caddaaladda iyo sugnaanta.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in la ogaado in sharciyadu aysan ka maarmin xaddidaad iyo fasiraaad heerkeedu sarreeyo. Waxay noqon karaan kuwo adag oo ay adagtahay in la tarjumo, dhaqangelintooduna waxay noqon kartaa mid aan sinnaani ka muuqan.

Intaa waxaa dheer, sharciyadu waxay mararka qaarkood ka tarjumayaan eexda iyo dhaqdhaqaaqa awoodda bulshooyinka iyaga abuura. Iyadoo ay jiraan caqabadahaas, haddana muhiimadda sharcigu u leeyahay qaabeynta bulsho caddaalad iyo nidaam leh ayaa ah mid aan la dafiri karin.

Fahamka iyo ku lug lahaanshiyaha sharciga, waxa ay gacan ka geysan karaan dhisidda mustaqbal wanaagsan oo nafteenna ah iyo jiilalka dabbe. Waxa aan rajeynayaa in qormadaani ay bixiso dulmar wanaagsan oo ku saabsan muhiimadda sharciga.